Duruusta tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

Qormadii 4aad

Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. (e-mail: cabdicaqli@hotmail.com.)

Wuxuu Sheikh Madar u anbabaxay magaalad Harar markii uu qaangaadhay oo ku beegan sannadkii 1841, si uu u sii korodhsado aqoontiisa diineed. Waxayna magaaladaasi xilligaasi ahayd xarunta diinta laga barto ee ugu weyn geeska Afrika. Sidaynu hore u soo sharaxnay, marka uu wiilku qaangaadho ayuu si fiican u ogaan jiray aqoonta uu ku wanaagsanyahay, waxaana xilligaasi u cadaan jiray halka uu kaga biirayo qaab dhismeedka bulshadiisa. Sheikh Madar wuxuu mar horeba go'aansaday kaalinta uu bulshadiisa ka buuxin doono. Taasoo uu isku hawliyay barashada diinta Islaamka.

Waxay bulshada Somaliland u qaybin jirtay ragga laba nooc oo kala ah ***"Wadaad"*** iyo ***"Waranle".*** Wadaadka waxaa lagu tilmaami jiray qofka aqoonta diinta bartay ee hawlaha diinta la xidhiidha ku hawlgala. Taasoo Aw hebel lagu magacaabi jiray kuwa aanay aqoontooda diineed heer sare gaadhsiisnayn, ee dalka gudihiisa uun diinta ku dhex bartay. Haddii se aqoontiisa diinta iyo aqoontiisa afka carabigu aad u sarreyso, waxaa lagu magacaabi jiray Sheikh hebel. Waxayna kuwaasi u badnaayeen kuwo barashadooda diinta dibedda ku soo qaatay. Ragga kale oo dhan waxaa lagu tilmaami jiray "Waranle." Kuwaasoo hawlgalada guud ee beesha heegan u ahaan jiray.

Sababta ragga labadani nooc loogu qaybiyay waxaa ugu wacnaa bulshada oo ku dhaqmi jirtay qaab beeleed ku salaysan abtirsiin iyo tolnimo. Tiiyoo aanu jirin maamul dawladeed oo dalka ka taliya, ayuu qaab beeleedkaasi ahaa ka lagu dhaqmo isagoo nabadgelyada iyo hantida qofkaba ka dhigayey mid beeshiisu masuul ka tahay. Haddii qof ama hantidiisa lagu xadgudbo waxay beesha uu ka tirsanyahay u arki jirtay in beesha oo idil ay ku xadgudubtay beeshaasi uu ka tirsanyahay qofka gefka galay. Taasi waxay abuuri jirtay in raggu, beel kasta ha ka tirsanaadeene, inay had iyo jeer heegan dagaal ku jiraan laguna magaacaabo waranlayaal, tiiyoo waranku ahaa hubka ugu weyn ee xilligaasi la isticmaali jiray.

Sida la ogsoonyahay diinta Islaamku ma oggola dhiigga muslimiinta dhexdooda ka dhex daadanaya. Sidaasi awgeed ayay dadka leh aqoon diineed uga fogaan jireen inay ka qayb qaataan dagaalada bulshadooda ka dhex oogan. Waxayna badanaa iska taagi jireen meel dhexe iyagoo nabadayn iyo dhexdhexaadin ku dedaali jiray. Sababtaasi awgeed ayay bulshadu ugu qaybsanayd Wadaad iyo Waranle.

Sheikh Madar wuxuu isagoo yar aad iskugu hawliyay barashada diinta Islaamka iyo afka carabiga.Waxaana inoo muuqata in uu mar horeba ka gaadhay go'aan kaalinta uu bulshadiisa ka buuxin doono, oo ah inuu ku biiray qaybta wadaadada. Hase ahaate, iskuma koobin inuu ku ekaado aqoontiii uu dalka gudihiisa ku bartay ee waxay ugu muuqatay inuu u baahanyahay inuu aqoontiisa diineed dibedda ka sii korodhsado.

Markii Axmed Shirwac ogaaday inuu wiilkiisu aad ugu wanaagsanyahay barashada aqoonta diinta Islaamka, ayuu u sii tabaabusha galay sidii uu wiilkiisa magaalada Harar ugu diri lahaa si uu u sii korodhsado aqoontiisa diinta. Waxaana tabaabushahaasi u sii hawl yareeyay xidhiidhka ganacsi ee ka dhexeeya Berbera iyo Harar, ee ay si joogta ah dadku labada dhinac ku kala nooli iskugu socdaan, wararkana u kala helaan. Waxaana suurto gal ah in Axmed Shirwac uu u socdaalay magaalada Harar isagoo u sii sahaminaya wiilkiisa ama u sii diyaarinaya cidda uu u xilsaarayo inay sii dhammaystiraan baahida wiilkiisa mudada uu joogo Harar. Gancsato badan oo Harar ku dhex nooli waxay u baahnaayeen xidhiidh joogto ah oo ay la yeeshaan Berbera. Waxayna dadka xogogaalka u ah taariikhdii Sheikh Madar inoo tibaaxeen in nolol fiican oo aan daba ka wer wer lahayn uu ku noolaa mudadii uu wax ka baranayey magaalada Harar.

Sheikh Madar wuxuu ka helay magaalada Harar bii'aad aad uga duwan bii'addii uu ku soo kacaamay. Wuxuu ku soo koray bii'ad reer guuraa xoolo dhaqato ah oo aanay jirin meel go'an oo qofna si joogta ah ugu waari karo. Taasina waxay aad u adkaynaysay waxbarashada qofka. Hase ahaatee markii uu Sheikh Madar yimid Harar wuxuu ka helay nolol magaalo oo aad uga duwan kii uu soo kacaamay. Waxay bii'adani cusubi noqotay mid magaalo si joogto loo deganyahay. Taasoo ahayd mid leh jewi ku habboon oo sahlaysa waxbarashadiisa. Waxaa taasi sii dheeraa jawiga wanaagsan ee magaaladu ku caanka tahay, biyaha aan kala go'in iyo beero cunno noocyo kala duwani ka baxaan.

Magaalada Harar waxaa lagu tilmaamaa in magaca loogu bixiyay sannadkii la asaasay ee xuruufta abjedigu sheegayso oo ah 405 Hijrada.(Ha= 5; Ra=200; Ra=200)= 405; oo ku beegan qarnigii kow iyo tobnaad ee miilaadiga. Waxaana lagu sheegaa inay ahayd casrigii Sheikh Abaadir, oo lagu magacaabo in uu yahay Sheekha magaalada Harar. Ilaa iyo casrigaa fog waxay magaaladu ku caan ahayd barashada diinta Islaamka. Hase ahaatee, wuxuu magaca magaaladu aad u weynaaday markii Amiir Abuubakar, uu xaruntii Boqortooyada Muslinka u soo wareejiyay bilowgii qarnigii 16aad, kadibna ay noqotay xarun uu Axmed Gurey ka abaabulo duulaanadii uu kula jiray Boqortooyadii kiristanka ee Xabashida. Waxaa kale oo ay magaaladu caan ku ahayd masaajidyada badan, oo lagu tilmaamo 99 masjid oo ku dhex yaalla dayrka qadiimka ah, ee uu dhisay Amiir Nuur sannadihii1550 kii.

Markii uu Sheikh Madar yimid magalada Harar waxaa ku dhex noolaa Somali badan oo iskugu jirta ganacsato, shaqaale, iyo arday diinta ka barata. Inkastoo ay Magaaladu caan ku noqotay diinta Islaamka laga baranayo, hadana ma jirin taakulo guud oo maamulka Harar ka taliyaa u fidiyo ardayda wax ka baranaysa. Waxaana lagama maarmaan ahaa in ardaydu kafaalo qaaddo kharashka noloshooda, iyo waxbarashadooda ku baxaya mudada ay wax baranayaan. Richard Burton oo soo booqday magaalada Harar sannadkii 1855, kuna beegan sanadihii uu Sheikh Madar wax ka baranaayey, wuxuu qoraalkiisa uu kaga waramayo wax barashada magaalada Harar ku sheegay:

" Ma jiraan Dhismayaal u gaar ah waxbarashadu, mana jiro waqaf, iyo kharash loogu talo galay ardayda wax ka baranaysa, sida dalalka muslinka ee bariga dhexe oo kale. Sida muuqata ma jirto wax dhiirigelin ah oo ardaydu hesho. Buugagga wax laga baranayaa aad ayey ugu yaryihiin magaalada, aadna waa u qaali. Cilmiga diinta oo keliya ayaa xoog loogu bartaa halkani. Macalimiinta ugu sarreysa ee diinta dhigtaa waa Kabiir Khaliil, Kabiir Yoonis, iyo Sheekh Jaamac. (Kabiir Khaliil iyo Sheekh Jaamac waa Soomali.): Labada hore (Kabiir Khaliil iyo Kabiir Yoonis) waabay yartahay inta ay guryahooga ka soo baxaan, waayo waxay waqtigooda oo idil ku dhameeyaan akhris iyo cilmi ay arday u dhigayaan". Kabiir Khaliil wuxuu ahaa macallinka ugu weyn ee Sheikh Madar wax ka soo bartay mudadiii uu Harar joogay.

Waxbarshada diinta ee Harar lagu bartaa waxay u qaybsanayd laba marxaladood. Marxaladda hore waxaa loo yaqaanay barashada cilmiga shariicadda. Marxaldda labaadna waxaa loo yaqaanay barashada cilmiga tasawufka. Waxaa marxaladda hore ee shariicada la baran jiray Tafsiirka Quraanka, Axaadiista, Sunnaha Nebiga, Axkaamta iyo Usuusha iwm. Marka ay ardaydu dhammaystirto marxaladaasi hore, kana gudubto imtixaanadii la xidhiidhayey oo idil ayaa ardayda ugu fiican marxaladaasi hore loo gudbin jiray marxalada labaad ee lagu baranayo cilmiga tasawufka.

Marxalada tasawufka ardayda u gudubta waxaa lagama maarmaan ahaa inay ka mid noqdaan jamaacad go'an iyagoo raacaya dariiqada Sheikha hogaaminay dariiqadaasi. Xilligii uu Sheikh Madar wax ka baranayey Harar waxay dariiqada magaalada lagu barto ahayd dariiqada qaadiriyada. Dariiqada Qaadiriyada waxaa lagu tilmaamaa inay tahay dariiqada ugu da'da weyn dariiqooyinka suufiga ee Islaamka oo idil. Waxaana aasaasay Sheikh Cabdilqaadir Al-Jiilaani oo noolaa qarnigii lixaad ee Hijarada. Waxayna dariiqadani aad uga hirgashay Harar Qarnigii 15aad markii uu keenay Sherif Abubakar al-Caydaruus Al-Cadani oo ku dhintay Cadan sanadkii 914 Hijrada (1509). Ilaa xilligaasi waxay dariiqadani ka ahayd magaalada Harar dariiqada rasmiga ah ee lagu barto. Waxayna aad ugu fidday dhulka u dhow Harar iyo dhulka waxbarasho u soo raadsado oo idil.

La soco Slaasada danbe